SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1074
WARQADDII LABAAD EE RASUUL BUTROS
CUTUBKA 3:7-10

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii labaad ee rasuul Butros cutubka 3aad. Cutubkan saddexaad wuxuu rasuulku uga hadlayaa saddex arrimood oo kala ah:

(1) Sida dunidu ay noqon doonto dabiicad ahaan wakhti ka hor intaanu Masiixu dunida ku soo laaban.
(2) Qorshaha Ilaah u hayo dunidan, waxaana loo kala saarayaa maaddadaas saddex mawduuc. Waxaana weeye duniyooyinkii hore, duniyooyinkii hore, kuwa maanta, iyo kuwa imanaya mustaqbalka.
(3) Waxaa ugu dambeeya canaanashada uu anaananayo rumaystayaasha masiixa, oo wuxuu siinayaa caqli

celin, talo iyo weliba tusmooyin aasaas u ah rumaysadka Masiixa, isla sidii rasuulladii kaleba ay inoo siiyeen. Waxaana hadalladiisa loo qaadanaya, **"Canaan waayeel."** Waa xusuusin uu dadka xusuusinayo aasaaska nolosha masiixinnimada iyo sidii loogu socon lahaa dariiqa ama tubta Masiixa.

SONG:REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay meeriska cutubka 3aad ee warqaddii labaad ee rasuul Butros. Waxaanan ka falanqoonaynay maaddada khusaysa hal duni oo loo qaybiyey saddex duni. Waxaanan ku jirnay mawduuca khuseeya duniyooyinkii hore, marka rasuul Butros leeyahay: **"..Kuwaas oo dunidii waagaas jirtay ay ku baaba'day iyadoo daad qaaday."**

Haddaba waxaa lala yaabban yahay oo laysku haystaa inuu rasuulku ka hadlayo dunidii jirtay intaan banii'aadamka la uumin iyo inay tahay tii ka dambaysay markii Aadan la abuuray, waana markii Ilaah dadkii nebi Nuux ku qarqiyey biyaha ama uu ku halaagay. Haddaba micna yeelan mayso aragti waliba ee adigu aad haatan rumaysan tahay. Waxaase ahmiyaddu tahay in dunida daad lagu halaagay wakhti hore. Waxaana isa-soo taraya caddaymaha sheegaya in duniyooyinkii hore la halagay oo wax walibana isbeddel ku dhacay, marka la eego sidii Ilaah ugu tala-galay bilowgii dunida.

Haddaan intaas ku soo koobno duniyooyinkii hore, ayaannu imminkana idiin bilaabaynaa inaan idiin falaynqayno:

DUNIYOOYINKA MAANTA.

Imminka rasuul Butros wuxuu ina hor keenayaa, maaddada labaad oo ah dunida maanta. Waa dunida

aniga iyo adigu aynu nool haya. Haddaan markaas ku hor-marno, intaynaan faallada bilaabin, waxa rasuulku leeyahay, ayaannu la soo kala baxaynaa Warqaddii labaad ee rasuul Butros 3:7, baalka 414 ee Axdiga Cusub. Waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Laakiinse samooyinka haatan jira iyo dhulkaba isku eray baa dab loogu kaydiyey, oo waxaa loo hayaa maalinta xisaabta iyo haligaadda dadka cibaadalaawayaasha ah."

Muxuu haddaba rasuulku leeyahay? Wuxuu leeyahay waxa dunidan lagu kaydiyey dab. Waa warbixin xaqiiqdii cajiib ah, maahan in lagu dhex kaydiyey, laakiin waa lala kaydiyey. Xaqiiqduna waxay tahay inay jiraan walxo dunida yaalla oo dunida burburin kara markii loo baahdo, ama ay talada Rabbiga sidaas ku ahaato. Looma jeedo in Ilaah samada ka soo dirayo dab, laakiin dhulka ayaa waxaa yeella dab lagu kaydiyey oo fulinaya qorshaha Ilaah.

Haddaba miyaannu garanaynaa in aniga iyo adigaba aynu ku dhex nool nahay duni laga buuxiyey baaruud ama atomic bomb. Haddaba, marka la doonayo in dunida la burburiyo way ka duwanaanaysaa sidii ay ahayd duniyooyinkii hore, kuwaasoo lagu halaagay daad. Daadka waxaa lagu halaagay duniyooyinkii hore, balse imminka dunidan aynu imminka ku nool nahay waxaa loo kaydiyey ciqaab kale, waana ciqaabta dabka ah.

Marka dhanka kale laga eego, waxay hadalladu u dhacayaan, dunidan hannaankeedu maahan mid joogta ah. Waxaa dunidu ku sii jeeddaa ciqaab kale oo ku soo fool leh, oo rasuul Butros wuxuu arrinka si

tafatiran inoogu sharraxayaa aayadda 10aad ee isla cutubkan. Markase uu leeyahay, **"Lagu kaydiyey"** ayaa eraygaasu noqonayaa isla eraygii Giriigga ahaa ee Sayidkeennu isticmaalay, ninkii bakhaarada u dhistay hantidiisii faraha badnayd.

Dadku waxay imminka soo saareen in dunida ay ka buuxaan waxyaabo badan oo qarxin kara, ama burburin kara dunidan. Waxay u muuqataa inay dadku soo saareen walxo qaraxyo waaweyn oo dunida laasta kicin kara inay haddana ku kaydsan yihiin dhulkeenna. Waxaana taasu ay cabsi-gellisay dadkii ama khubaradii soo ogaatay sida atomku wax u halaagi karo ama u baab'in karo. Khabiirka la yiraahdo Ditoor Urey oo wax ka dhiga jaamicadda Chicago, oo ku takhasusay cilmiga physicska ama walxaha ayaa waxaa maqaalad uu ku qoray jariidad toddobaadle ah. Waxaana hadalkiisa ka mid ahaa oo uu yiri, Anigu waan baqayaa, waxaanan doonayaa weliba inaan idinkana idin cabsi geliyo marka aan idiin sharraxayo sida atomku wax u halaago. Raggii kale ee atamku cabsi geliyey waxaa ka mid ahaa ninka la yiraado, Sir Winiston Church Hill oo isagu ra'iisal Wasaare ka ahaa dalka Ingiriiska xilligii dagaalkii labaad ee dunida lagu jiray, waxaana uu yiri ama leeyahay: **"Wakhtiga dunidani waa gabaabsi, ama wakhtigu wuu is-gurayaa."** Nin kale oo aqoon weyn lahaa ayaa isna wuxuu yiri, **"Nin waliba oo khabiir ah oo baaritaanno ku sameeyey ilbaxnimadii hore, ayaa wuxuu welwel ka muujinayaa sida dunida ku dambayn doonto, oo mid waliba wuxuu mala'awaalayaa sida mustaqbalka dunidu noqon doonto."**

Rag kale oo fara badan ayaa ka hadlay in

baaritaannada dunida maanta ka soconaya uu sii kordhinayo oo keliya walaacii dadka, waayo wxaa u soo baxaysa in dunidu ay ka timid ciqaab oo ay ku sii jeeddo ciqaab, iyo in wakhtiga dunidanu uu gaaban yahay ama gabaabsi yahay. Haddaba marka khubaradii cilmiga dunida ay sidaas u hadlayaan, waa sidee aniga iyo adiga saaxiib, waa kuweenna rmaysan kitaabka Qoduuska ah.

Sidee bay taasu inoo saamaynaysaa, waa in dunidan ay ku dambayn doonto ciqaab iyo sida loo burburin doono, miyaanay ahayn inaannu muujinno feejignaan iyo taxaddar dheeraad ah? Hadaba yaanay kula noqon inaan leeyahay, ciqaabta dunida waxay ka imanaysaa atomic bomb, oo sidaasaa Ilaah u burburinayaa dunida. Waxaanse leeyahay, dadku waxay garteen in dunida lagu kaydiyey dab, oo waxay kitaabka kala soo bexeen in Ilaah dab ku kaydiyey dunida. Waana qidacada aynu ku arkayno Warqaddii labaad ee rasuul Butros.

In dunida dad lagu rogi doono, maahan mid macquul ah laakiin waa mid cilmiyan ah in dunidan lagu halaagi doono dab. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 3aad ayaannu imminka idiin kahriyeynaa aayadda 8aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Laakiin, gacaliyayaalow, waxan keliya ha illlloobina in maalin keliyahu Rabbiga la tahay sida kun sannadood, kun sannadoodna la yihiin sida maalin kaliya."

Waa hubaal haddaba in baaba' dunida iyo samadaa uu dhici doono, wakhtiga lagu jiro Maalinta Rabbiga, waana waana wakhtiga toddobada sannadood ee lagu

jiro Wakhtiga dhibka weyn iyo kunka sannadood ee wakhtiga marka boqortooyada Masiixu ay dhulka imanayso. Markii Sayid Ciise Masiix dunida ku soo laabto oo ah dhammaadka Wakhtiga dhibka weyn uu ka soconayo dunida ayuu wuxuu dunida ka taagi doonaa boqortooyadiisa, wuxuuna dib u cusboonaysiinayaa dhulka–oo cusboonay-siintaasuna noqon mayso mid joogto ah.

Haddaba dhulka iyo samadaba lama burburin doono ilaa laga soo gaarowakhtiga dhibka weyn, waana wakhtiga rasuul Butros imminka uu ka hadlayo. Xitaa haddii wakhtiga Sayidka lala kulmayo uu yimaado berri, weli dunidanu waxay sii jiraysaa kun sannadood oo kale. Waxaase xaqiiqo ah in samada iyo dhulkaba la burburin doono, oo wakhtiga la baabi'in doonana wuu soo socdaa.

Haddaan horey idiinku sii wadno warqaddan labaad ee rasuul Butros ayaannu haatan idiin ahriyeynaa dhegaystayaal cutubka 3:9, baalka 414 ee Axdiga Cusub, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Rabbigu kama raago inuu ballankiisa oofiyo sida dadka qaarkiis ku tiriyo inay tahay raagid, laakiinse idinkuuu idiin dulqaadanayaa, oo diini maayo in qofnaba halligmo, laakiinse wuxuu doonayaa in kulli la wada toobad keeno."

Ilaah waa dulqaad badan yahay, oo maahan mid degdeg wax ku sameeya. Ilaah waa baaqi, oo innaba welwel kuma jiro. Kun sannadood waxay u tahay sida hal maalin, oo hal maalinna waxay isaga u tahay kun sannadood. Warku wuxuu u dhacayaa in wakhtigu imanayo marka samada iyo dhulkaba la duuduubi doono. marka ay sidan tahay wuxuu dadka, meel waliboo ay

joogaanba, siinayaa fursad ay ugu soo noqdaan isaga. Sababtaas ayaa haddaba aniga iyo adibaga laynooga duunayaa inaynu Hadallada Ilaah gaarsiinno dadka. Waana sheeyga keliya ee qofka noloshiisa beddeli kara. Waa hadallada Ilaah kuwa qofku ay mar kale ka dhashaan, sila sida rasuul Butros inoogu soo sheegay warqaddiisii kowaad, markaasoo uu lahaa, sida ku qoran 1:23 oo leh:
"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah erayga Ilaah oo nool oo waara." Waxaa haddaba danta Ilaah ay tahay inuu wax badbaadiyo.
Waxaana rasuulka oo Ruuxa Ilaah ka dul-hadlayaa leeyahay: **"Laakiinse idinkuu idiin duqlqaadanayaa, oo dooni maayo in qofna haligmo, laakiinse wuxuu doonayaa in kulli la wada toobad keeno."** Haddaba maahan doonista Ilaah, in adigu aad dembiyadaada ku dhimato. Waxa nin waliba kitaabkan u akhrisanayo waxaa weeye bal inuu arko in Ilaah aanu doonaynin inuu wax ciqaabo. Wuxuu doonayaa in dadku dhimashada kan karto.
Waxaana weeye inaad Ilaah u timaaddo oo aad qaabisho nabaadiinada uu ku siiyey. Miyaad garanaysaa haddaba inaadan istaajin karin jacaylka Ilaah kuu hayo adiga, welibana ma diidi kartid jacaylkiisa, oo weliba jacaylkiisa iskama wareejin karti. Balse markii uu dusha sare kaaga soo hooro, waxaad qaadan kartaa dallad oo waad diidi kartaa inuu kuugu soo hooro, oo ay kuugu da'do nimcada Injiilka Ciise Masiix.
Waxaa loo jeedaa waxaad kaga hor tagaysaa jacaylka Masiixa, dalladdaada dembiga, iyo tan

fallaagannimada si aadan u helin ama aanu kuu soo gaarin jacaylka Masiixa, laakiin waxaa cad inaadan istaajin karin jacaylka Masiixa. Waxaan akhriyey qiso la qoray wakhti hore, waana qisooyinka loo yaqaanno Greek mythology. Waxaa dhacday in wiil madi ah uu la joogay hooyadii oo iyadu aad iyo aad u jeclayd isaga. Waxaa dhacday wakhti dambe in wiilkii arkooday gabadh, oo isaguna gabadhii buu aad u jeclaaday. Balse gabadhii waxay iyadu a aad u nebcaatay wiilka hooyadii. Wakhti dambe ayuu u yimid gabadhii uu waayada badan jeclaa.

Wuxuu ku yiri gabar yahay aan ku guursado. Waxay ku tiri, haddii aad iska soo goyso wadnaha hooyadaa, markaas oo keliya ayaan ku guursan karaa. Wiilkii waxba ma hubsane hooyadii buu u tegay oo wuu soo dilay, markaasuu kala soo baxay wadnaha. Intii uu jidka sii socday, ayaa waxaa la yiri wiilkii kufay. Markaasaa wadnihii la hadlay oo ku yiri, **"Wiilkaygiiyow, miyaad kuftay?"** Weli wuu iska jari waayey jacaylkii hooyannimo.

Waxaan markaas kuu sheegayaa in isla sidaas oo kale aadan innaba ka baxsan karin jacaylka Masiixa. Isagu wuu ku jecel yahay oo adigana innaba ma hor-istaagi kartid jacaylkiisa iyo weliba danayntiisa, iyo tabantaabadiisa. Waxaa qorniinku leeyahay, **"Ilaah wuxuu roob u soo diraa kan wanaagsan ee xaqa ah iyo weliba ka sharka leh."**

Inkastoo aad shar leedahay haddana Ilaah waa ku jece yahay. Waxaan markaas kuu sheegayaa in Sayid Cisie Masiix ku badbaadinayo haddii aad aqbasho badbaadada uu bixiyo. Waa in aad xaalka haatan beddeshaa oo wax walibana maahan inay u socdaan

sidii hore. Waxaan garanayaa sida noloshaadu tahay dhegaystaha aan weli Masiixa rumaysaninow. Waxaad ku nooshahay nolol wel weli iyo tiiraanyo badan. Nolol hubaal la'aan iyo horukac la'aan ah. Nolol jahwareersan, nolol aadan midigtaada ka garanaynin bidixdaada. Markaa waa laga roon yahay noloshan aad marna kacayso marna kufayso. Waxaa kuu wanaagsan inaad qaadato badbaadada Masiixa nuurka badan kuu hayo.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka saddexaad, ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 10aad, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Laakiinse maalinta Rabbigu waxay u iman doontaa sida tuug oo kale; maallintaas oo ay samooyinku baabi'i doonaan iyagoo sanqadh weynu ka yeedhayso, oo waxyaalaha abuuranna iyagoo gubanaya ayay baabi'i doonaan. dhulka iyo shuqullada ku jirana waa la gubi doonaa."

Wuxuu rasuulku leeyahay, **"..laakiinse maalintu waxay u imanaysaa sida tuug oo kale."** Haddaba waxaa jira doodo laga qabo in maalintaas iyada ah ay tahay maalinta Sayid Ciise Masiix dunida ku soo laaban doono iyo in kale. Waxaan anigu rumaysanahay in Maalinta Rabbigu ay tahay wakhtikooban oo ka mid ah wakhtiga dhibka weynu dunida ka bilaabanayo.

Waxaana xigaya wakhti gaaraya kun sannadood oo Masiixu dunida xukumayo. Dabadeedna waxaa xigaya fallaagannimo Shayddaanku wado, waxaana billabanaya wakhtiga marka Masiixu ku fariisanayo carshiga cad ee weyn. Sida markaa ku qoran kitaabak Muujintii, waxaa la abuurayaa samooyin cusub iyo

weliba dhul cusub.
Waxaa haddaba weedha ah, **"...sida tuug oo kale,"** isticmaalay rasuul Bawlos sida ku qoran warqaddiisii kowaad ee reer Tesaloniika 5:2, markaaasoo uu lahaa, **"Maalinta Rabbigu waxay u imanysaa sida tuug u yimaado wakhti aan la filanaynin."** Haddaan faallada rasuul Butros ku soo noqonno, ayaa waxaa rasuul Butros leeyahay, **"maalintaas oo ay samooyinku baab'i doonaan, iyagoo sanqadh weyn ka yeedhayso."**
Erayga rasuul Butros ula isticmaalay sanqadh waa erayga giriigtu ay ula isticmaalaan, xiinka gamuunka, shanqadha biyaha, iyo sawaxanka masaska marka ay dhulka ku socdaan. Erayga la isticmaalayna waxaa weeye rhozedon oo ka dhigan guux ama sanqadha bombaanooyinka waaweyn, sida tii lagu tuuray Horishima oo ka mid ah dhulka Jabbaan.
Waxaa rasuulku haddaba raacinayaa oo uu leeyahay: **"Waxyaalaha abuuranna iyagoo gubanaya ayay baabi'i doonaan..."** Haddaba sidaad arkaysaan, walxuhu joogto maahan, sida bari hore inala ahayd. Walxaha waa la baabi'in karaa--haddii loo beddelo tamar.. Waxaa rasuul Butros inta uga hadlayaa, **"Walxo,"** waana walxaha ama lakabyada dhulka, oo Giriig ahaan noqonaya stocheia, Eraygaas ayaa kaga wanaagsan kan aynu isticmaalno ee Atomka saynis ahaan, waana eray Giriig ah, oo macnahiisu yahay sheey aadan aadan cirib tiri karin ama aan baaba'aynin. Waxaannu wada garanaynaa in atomku uu yahay walax aan la kala wadi karaynin, ama aan kala go'aynin. Waxaase rasuul Bawlos isticmaalayaa erayga dhalaalis ama baaba' oo giriig ahaan eraygaasu wuxuu noqonayaa luo, taasu

macnaheedu yahay kala furis. Dadku waxay kala siibeen atomka, waxaana u soo baxay quwaddan atoomikada oo noqotay wax cajiib ah. Maanta dad badan ayaa waxay isku dayayaan inay tamartaas sii daayaan, waayo aniga iyo adigaba waxaannu ku nool nahay adduun kheyraadkiisu gabaabsi yahay. Markii Ilaah dunida uumay wuxuu ku uumay saliid, iyo khudrad aad u fara badan.

Wax walibana dhexdeeda ayey ceegaageen. Dadkii markii ay dmebaabeen wax waliba ee dunida yaalay ayey halleeyeen ama ku dheeleen. Waxaanay nabaad-guuriyeen dhulkii, waxaanay beytamaaliyeen kheyraad fara badan oo dadku ay ku intifaaci lahaayeen ilaa iyo wakhti dheer.

Marka ay sidaas tahay atomka aad arkaysaan waxaa ku jira tamar aad iyo aad u weyn. Markii Ilaah dhulkan baabi'inayo, waa hawl cajiib ah. Waxaana ka yeeri doona deryaan iyo guux ama dhawaaq weyn oo isagoo kale aan horey loo maqal. Waxaan u malaynayaa in Ilaah isticmaali doono atom, markii uu sidaas yeelana dadku ayan kol dambe awoodi doonin inay kala furaan atomka. Waxaa haddaba rasuulku raacinayaa, oo uu leeyahay:

"Dhulka iyo shuqullada ku jirana waa la gubi doonaa." Waxaa ka mid ah waxa dhulka ku jira biyaha dhulka kor yaalla--biyaha waa gubanayaan. Waxaan kaganaynaa in biyuhu ay yihiin laba walxo oo isku tegay, waana hydrogen iyo xoygen, labaduba waa gas wax halaaga ama haddii dab lagu dhejiyo aanay waxba ka soo haraynin. Waxaa jira sida khubarada dabka ku shaqada leh ay inoo sheegayaan, walxo haddii laysku dayo in biyo lagu demiyo, ay dabka sii hurinayaan,

laakiin aanay innaba demin karin.
Haddaba nimanka demiya dabka kuma demiyaan holaca dabka biyo oo qura, waxaase ay isticmaalaan kiimikooyin ku caawiya biyaha inay dabka demiyaan. Waxaa markaa rasuul Butrosna leeyahay, **"Dhulka iyo shuqullada ku jirana waa la gubi doonaa."** Marka warka la soo gaabiyo wuxuu leeyahay rasuul Butros Ilaah wuxuu xukumay duniyooyinkii hore, duniyooyinka mustaqbakana xukun baa ku soo socda. Bilowgii cutubka ayaa waxaa rasuul Butros leeyahay, sida ku qoran aayadda 4aad, **"...waayo haatan iyo maalintii awowyaashii ay dhinteen wax waluba way u socdaan sidii ay ahaayeen tan iyo bilowgii abuurniinta."** Kuwa dacaayadeeya dadka Ilaah, waxba ka garan maayaan duniyooyinkii hore. Waxaa duniyooyinkii hore aad u yaqaanna khubarada cilmiga sayniska, kuwooda aaminsan nolosha meerta oo is-bedbeddesha.
Waxay aaminsan yihiin ragga garashada u leh cilmi-sayniska in buuruhu ku samaysmeen qarax aad u weyn iyo dhul gariir dab wata ama volcano. Haddaba waxyaabihii hore ama duniyooyinkii hore, ama volcano ha ku dhacdo ama dhulgariire, waxaa ku dhacay xukun rabbaani ah.
Haddaba marka la leeyahay maalinta Rabbiga, ayaa waxay tahay waxyaabo qorniinka laga isticmaalo. Nebiyadii Ilaah ayaa isticmaali jiray maalinta Rabbiga, oo qorayaal badan oo ku qoran kitaabka Qoduuska ah ee Axdigii Hore, ayaa isticmaalay weedha ah, **"Maalinta Rabbiga."** Waxay maalinta Rabbiga ku bilaabanaysaa gudcur isla sida nebiyadii Axdigii Hore ay inoo sheegayaan. Waxay ku dhammaanaysaa

maalinta Rabbiga xukun weyn, markaasoo samada iyo dhulkaba la duuduubi doono.

Inta ka dhex leh labadaas xukun ama dhacdo waxaa dadku ku jirayaan wakhtiga dhibka weyn, oo ah maalinta Sayidku imanayo dunida, oo uu dhulka ka dhisi doonoBoqortooyadiisa, marka la gaaro xilliga Sabaanka, dabadeetana shayddaanka ayaa xoogaa yar la sii dayn doonaa, markaasaa waxaa kacaya fallaagannimo, oo dadku waxay daba-gelayaan shayddaanka, dabadeedna shayddaanka ayaa la xirayaa weligiis, waxaana bilaabanayo xilliga marka Sayidku ku fariisan doono carshiga cad ee weyn, markaasoo uu xukumi doono kuwa baadiyoobay.

SONG: REEL----CUT----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad

maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin